


# Sidii aad uga codeen lahayd goobta codeenta

Tuse akhriskiisu fudud yahay



## Sidii aad u isticmaali lahayd tusahan



Golaha Doorashada Australia (AEC) ayaa qoray tusahan. Markaad aragtid erayga 'anaga' micnahiisu waa AEC.



Waxaan u qornay tusahan si sahlan oo la akhrin karo.

Waxaan isticmaalnaa sawiro si aan ugu sharaxno fikradaha qaar.



Waxaan ku qornay erayada qaar qoraal **madow**.

Waxaan sharaxnaa micnaha erayadan. Waxaa jira liis dhan oo erayadaan ah bogga 29-naad



Waxaad weydiisan kartaa caawimaad si aad u akhrisid tusahaan. Saaxiib, xubin qoyska ah ama qof ku taageera ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo.

## Maxaa ku jira tusahan?

Codeynta doorashada	4
Isu diiwaangelinta si aad u codeysid	6
Goormaad u baahan tahay inaad codeyso?	7
Ka waran hadii aadan codeyn karin maalinta doorashada?	8
Xagee baad u aadi kartaa si aad u codeysid?	10
Maxaa dhacacaya maalinta doorashada?	12
Muxuu sameyn doonaa sarkaalka doorashadu?	15
Maxaad ku sameynaysaa waraaqaha doorashada?	17
Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cagaaran?	18
Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cad?	20
Ka waran hadii aad u baahatid in lagaa caawiyo buuxinta waraaqahaaga doorashada?	24
Ka waran hadii aad khalad sameysid?	25
Xagee baad dhigeysaa waraaqahaaga cod bixinta?	26
Tababar masii sameen kartaa codeynta ka hor doorashada?	27
Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?	28
Liiska erayada	29
Nagala soo xiriir	33

## Codeynta doorashada



Australia gudaheeda waxaan leenahay doorashooyinka dawlada dhexe qiyaastii 3-dii sanaba.



Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.



Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



Xeer ilaaliyaha Guud ayaa doorta taariikhda doorashada. Maalinta doorashadu waxay noqoneysaa Sabti.



Maalintas, dadka Australian ka ahi way codeynayaan.

Markaad codeeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.



Waa inaad codeysa haddii aad:

- **Muwaadin** australiyaan ah tahay oo
- aad jirto 18 sanno ama ka weyn.



Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiin.



Codeeyntu waxay kuu ogolaanaysaa inaad wax ka go'aamiso cida maamuleysa dalkeena.


## Isu diiwaangelinta si aad u codeysid



Ka hor intaadan codeen, waa inaad isdiiwaangelisaa.




Markaad is diiwaangelisid, waxaan magacaaga ku dareena liiska **codeeye yaasha** - dadka codeen kara.



Liiskan waxaa la yiraahdaa **diiwanka doorashada**.



Si aad u gashid diiwaanka doorashada, waa inaad buuxisaa foomka doorashada.



Waxaad akhrin kartaa tusaheena oo kuu sheegaya sidii aad isu diiwaangelin lahayd – *Sidii aad isu diiwaangelin lahayd si aad u codeeyso.*

## Goormaad u baahan tahay inaad codeyso?



Xeer ilaaliyaha Guud ayaa doorta taariikhda doorashada.



Waan u sheegi doonaa dadka taariikhda doorashada la qabanayo marka la go'aamiyo.



Hadii aad dooneysid inaad ogaatid maalinta doorashada la qabanayo, waad ogaan karta:

- booqo website keena [www.aec.gov.au](http://www.aec.gov.au)
- weydii xubin ka mid ah qoyskaaga, saaxiib ama deris.
- ka daawo warka TV-ga
- baar online
- Naga soo wac **13 23 26**.



**8am**

Maalinta doorashada, codeyntu waxay furantaa 8-da subaxnimo.



**6pm**

Maalinta doorashada, codeentu waxay xirantaa 6-da fiidnimo.



Waa inaad codeysaa ka hor intaysan xirmin codeentu.

## Ka waran hadii aadan codeyn karin maalinta doorashada?



Mar marka qaar, dadku ma codeen karaan maalinta doorashada.



Tan waxaa laga yaabaa inay sababtu tahay inay u baxayaan fasax.



Ama waxaa laga yaabaa inay isbitaal ku jiraan.



Hadii aadan codeyn karin maalinta doorashada, waxaad codeyn kartaa doorashada ka hor.






Waxaad ka codeyn kartaa goobaha codeenta maalinta doorashada ka hor.




Hadii aad na soo wacdid, waxaan kaa caawin doonaa helitaanka midka kuu dhow.

**13 23 26**



Waxaad sidoo kale noogu soo diri kartaa codkaaga boostada.

Tan waxaa loogu yeeraa ku **codeenta boostada**.



Waxaad ka akhrin kartaa sidii aad ugu codeyn laheed boostada tusaheena – *Sidii aad ugu codeen laheed boostada.*


## Xagee baad u aadi kartaa si aad u codeysid?



Maalinta doorashada, waxaad aadi karta **goobta codeynta** si aad u codeysid.



Goobta codeyntu waa dhisme, sida dugsi ama xarun bulsho, halkaas oo dadku ay aadaan si ay ugu codeyaan inta doorashada lagu jiro.



Waxaad badanaa ka heli karta goobta codeenta meel gurigaaga u dhow.



Marka la go'aamiyo maalinta doorashada, waxaan soo dhigeynaa liiska goobaha doorashada website keena.

[www.aec.gov.au](http://www.aec.gov.au)



Ama waad na soo wici kartaa waxaana kaa caawin doonaa helida goobta codeynta.

13 23 26



Ama waad na soo wici kartaa waxaana kaa caawin doonaa helida goobta codeynta.



Hadii aad joogto gobol ama territory kale maalinta doorashada, waxaad ka codeyn kartaa xarunta codeenta ee gobolada u dhaxeysa.

## Maxaa dhacacaya maalinta doorashada?

### Banaanka goobta codeenta



Banaanka goobta codeynta, waxaad ku arki doontaa:

- Cod bixiyeyaal – dadka codeyn kara
- dadka taageeraya musharaxiinta.



Musharaxa waa qof doonaya inuu ka mid noqdo Baarlamaanka.




Waxaad u codeyn karta musharaxa aad rabtid inuu ku guuleysto doorashada.



Dadka taageeraya musharaxiinta waxay kuu dhiibayaan waraaqaha *sidii aad u codeyn laheyd* .



*Waraaqaha sidii aad u codeen laheed* waxay kuu soo jeedinayaan *sidii aad u dooran laheed* si aad ugu codeysid mid kasta oo ka mid ah musharaxiinta.



Warqada *sida aad u codeen laheyd* waxaa laga yaabaa inuu sidoo kale kaa caawiyo:

- Xulatiid musharaxa aad rabtid inaad u codeysid
- ugu codee sida saxda ah musharaxaas.



Uma baahnid inaad qaadatid wax ah waraqada *sidii aad u codeyn lahayd*

## Goobta codeenta gudaheeda



Markaad gashid goobta codeenta gudaheeda, waxaa joogi doona saraakiisha doorashada.



Saraakiisha doorashada waa dad ka shaqeeya goobaha codeenta maalinta doorashada.

Waa shaqadooda inay ku caawiyaan.



Markaad gasho gudaha goobta codeynta, waxaa laga yaabaa inaad ku sugto safka.



Hadii uusan jirin saf, waxaad si toos ah u tegi kartaa miiska oo aad la hadli kartaa sarkaalka doorashada.

## Muxuu sameyn doonaa sarkaalka doorashadu?




Sarkaalka doorashada wuxuu ku weydiin doonaa 3 su'aalood.

### 1. Waa maxay magacaaga oo buuxaa?



U sheeg sarkaalka doorashada:

- magacaaga koowaad
- magaca u danbeeya.



Waa inaad u sheegtaa iyaga isla magacii aad noo sheegtay markii aad isu diiwaangelisay inaad codeyso.

### 2. Xagee ku nooshahay?



U sheeg adreska gurigaaga.



Waa inaad u sheegtid isla adreskii aad noo sheegtay markii aad isu diiwaangelisay inaad codeysid.



Sarkaalka doorashadu wuxuu ka raadin doonaa magacaaga diiwaanka doorashada.


Markay helaan magacaaga, waxay ka calaamadeynayaan diiwaanka doorashada.

### 3. Doorashadaan hore miyaad u codeysay?



Dheh “Maya” haddii aadan mardhawaydba codeen:

- maalinta doorashada
- ka hor maalinta doorashada, sida ku codeenta boostada.



Sarkaalka codeenta wuxuu ku siin doonaa 2 waraaqood oo doorasho.

- mid cad
- mid cagaaran.



Waraaqaha doorashada:

- waa foomam aad buuxineysid si aad u muujisid cidaad rabto in aad u codeysid
- ku qor magacyada musharaxiinta.



## Maxaad ku sameynaysaa waraaqaha doorashada?



Markaad hesho waraaqahaaga doorashada, u qaado mid ka mid ah shaashadaha codeenta ee baakadaha ah.



Shaashaduhu waxay kuu ogolaanayaan inaad ku buuxisid waraaqahaga doorashada halkaas oo aan cid kale ku arki kareynin.



Halkaasna waxaa yaala qalin qori aad isticmaasho.

Laakiin waxaad isticmaali kartaa qalinkaaga ama qalin qorigaaga hadii aad rabto.

## Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cagaaran?



Warqadaada doorashada ee cagaarka ah waxaa loogu talagalay **Aqalka Wakiilada**.


Aqalka Wakiilada:



- Waa mid (1) ka mid ah labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – guriga dawlada laga soo dhiso.



- Wuxuu ka kooban yahay 151 qof oo ay u codeeyeen dadka Australia.



Warqadaadaada doorashada cagaaran waxay leedahay:

- liiska magacyada musharaxyada
- sanaadiiq maran

**1**



Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeeyso inta badan.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.

**2**




Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeyso ee ku xigga.


Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Sii wad doorashada musharaxiinta iyo qorida lambarada ilaa dhamaan sanduuqyada aad wada buuxisid.



Musharaxiinta qaarkood waxaa laga yaabaa inay leeyihiin erayo ama sawiro ku xiga magacooda.



Sanduuq kastaa waa inuu lahaadaa lambar gaar ah.



Marka sanduuq kastaa buuxsamo, warqadaada doorashado waa eey dhamaatay.

## Sidee baad u buuxineysaa warqadaada doorashada ee cad?



Warqadaada doorashada ee cad waxaa loogu talagalay **aqalka sharci dejiyayaasha**.

Aqalka sharci dejiyayaasha:



- Waa mid (1) ka kooban labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – waxaa loo yaqaan aqalka sare



- waxaa ku jira 76 qof oo ay u codeeyeen dadka australiyaanka ahi si ay u metelaan mid kasta oo ka mid ah:
  - 6-da gobol
  - 2-da territory



Warqadaada doorashada ee cad waxay leedahay xariiq madoow.



Waxaa jira liiska kooxo ka koreeya xariiqda madoow.

Kooxaha badidoodu waa **xisbiyada siyaasada**.



Xisbiga siyaasadu waa koox ka kooban musharaxiin oo:

- wadaaga fikrado isku mid ah
- isku raaca sidii dawladu ay u maamuli laheyd dalkeena.



Waxa jira liis musharaxiin ah ee ka hooseeya xariiqda madow.

Waxaa jira 2 siyaalood oo aad u buuxin kartid warqada doorashada ee cad:



- ku qor lambaro sanduuqyada ka koreeya xariiqda madoow oo u codee kooxaha.

ama



- ku qor lambaro sanduuqyada ka hooseeya xariiqda madoow oo u codee musharaxiinta.

## U codeenta Khadka madoow korkiisa



Dooro kooxdaad rabtid inaad codkaaga ugu badnaan siisid.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.




Dooro kooxdaad xigta ee aad rabtid inaad codkaaga siisid.

Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.




Sii wado xulashadaada ku aadan kooxaha iyo ku qorida lambarada ilaa 6-da sanduuq buuxsamaan.

Waxaad ku joojin kartaa 6-da ama sii soco.



Hadii ay jiraan wax ka yar 6 sanduuq oo banaan, lambar ku qor sanduuq kasta.



Qooxaha qaarkood waxaa laga yaabaa inay leeyihiin erayo ama sawiro ku xiga magacooda.

## Ku codeenta xariiqda madoow hoosteeda



Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeeyso inta badan.

Ku qor 1 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Dooro musharaxa aad rabtid inaad u codeeyso ee ku xigga.

Ku qor 2 sanduuqa banaan ee ku xiga magacooda.



Sii wad xulashada musharaxiinta iyo qoritaanka lambarada ilaa 12-ka sanduuq ay buuxsamaan.

Waxaad ku joojin kartaa 12-ka sanduuq ama waad sii wadi kartaa.



Hadii ay jiraan wax ka yar 12 sanduuq oo banaan, lambar ku qor sanduuq kasta.

## Ka waran hadii aad u baahatid in lagaa caawiyo buuxinta waraaqahaaga doorashada?



Hadii aad u baahan tahay caawimaad markaad codeenaysid, waxaad sameen karta:

- sii kaxeeyso qof ka mid ah qoyskaaga ama saaxiib
- weydii shaqaalaha doorashada.

Shaqaalaha doorashada:



- Waxeey kaa caawin karaan sidaad u buuxin laheed waraaqda doorashada



- kuuma sheegi karo qofka aad u codeyn laheed




- Codkaaga wuxuu ka dhigi doonaa mid sir ah.



## Ka waran hadii aad khalad sameysid?



Haddii aad khalad sameysid markaad buuxineysid waraaqahaaga doorashada, dib ugu celi shaqaalaha doorashada ee ku siiyey.



U sheeg shaqaalaha doorashada inaad:

- khalad sameysay
- oo aad u baahan tahay warqad doorasho oo cusub.

Shaqaalaha doorashadu wuxuu



- wuxuu kaa qaadi doonaa waraqada doorashada ee aad khaladay
- wuxuu ku siin doonaa warqad cusub oo doorasho.



Waad qaadan kartaa warqada doorashada ee cusub si aad u buuxisid.

## Xagee baad dhigeysaa waraaqahaaga cod bixinta?



Markaad buuxiso **waraaqahaaga** doorashada, waxaad u baahan tahay inaad ku ridid **sanduuqa doorashada**.



Sanduuqa doorashada waa sanduuq xiran halkaas oo ay codeeyayaashu ku ridaan waraaqaha doorashada markay buuxiyaan.

Waxaa jiri doona 2 sanduuq oo doorasho:

- 1 loogu talagalay warqada doorashada ee cagaaran
- 1 warqada doorashada ee cad.



Warqadaada doorashada ee cagaaran waxaa lagu ridayaa sanduuqa doorashada ee ay ku qoran tahay: Cagaar.



Warqadaada doorashada ee cad waxay gelayaa sanduuqa ay ku qoran tahay: Cadaan.



Hadii aad u baahatid caawimaad, waxaad weeydiisan karta shaqaalaha doorashada.



Markaad codkaaga gelisid sanduuqa doorashada, waad dhameysay cod bixintaadii.

## Tababar masii sameen kartaa codeynta ka hor doorashada?



Hadii aad dooneysid inaad isu sii diyaariso ood tababar usii sameyso codeenta, waxaad booqan kartaa website keena.

[www.aec.gov.au/practice](http://www.aec.gov.au/practice)



Codkaaga tababarka ahi lama xisaabinayo.



Weli waxaad u baahan tahay inaad codeysid:

- goobta codeynta  
ama
- boosta ahaan

## Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheeraad ah?

Hadii aad dooneysid inaad heshid xog dheeraad ah oo ku saabsan codeynta, waxaan haynaa laba tuse oo kale oo aad akhrin kartid:



- *Sidii aad isu diiwaanglin lahayd si aad u codeysid*
- *Sidii aad uga codeyn lahayd goobta codeynta.*



Waxaad ka heli kartaa tusayaashan website keena.

[www.aec.gov.au/assistance](http://www.aec.gov.au/assistance)




Waxaan sidoo kale idiinkugu heynaa macluumaad website keena dadka ku hadla luuqado aan ahayn Ingiriiska.

## Liiska erayada



### Sanduuqa doorashada

Sanduuqa doorashada waa sanduuq xiran halkaas oo ay codeeyayaashu ku ridaan waraaqaha doorashada markay buuxiyaan.



### Waraaqaha doorashada

Waraaqaha doorashada:

- waa foomam aad buuxineysid si aad u muujisid cidaad rabto in aad u codeysid
- ku qor magacyada musharaxiinta.



### Muwaadin


Muwaadin waa qof la siiyey xuquuqda iyo xoriyada dalka meeshay ku nool yihiin.



### Shaqaalaha doorashada

Dadka ka shaqeeya goobaha doorashada maalinta doorashada.

Waa shaqadooda inay ku caawiyaan.



## Diiwaanka doorashada

Liiska dhamaan codbixiyeyaalka.



## Isdiwaangeli

Markaad is diiwaangalisid, waxaan magacaaga ku dareynaa liiska cod bixiye yaalka.



## Doorashada dawlada dhexe

Doorashada dawlada dhexe waxaa loogu talagalay dalka oo dhan.

Waa sidaan u doorano dawlada Australia.



## Aqalka Wakiilada

Aqalka Wakiilada:

- Waa mid (1) ka mid ah labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – guriga dawlada laga soo dhiso.
- Wuxuu ka kooban yahay 151 qof oo ay u codeeyeen dadka Australia.

## Xisbiga siyaasiga




Xisbiga siyaasadu waa koox ka kooban musharaxiin oo:

- wadaaga fikrado isku mid ah
- isku raaca sidii dawladu ay u maamuli laheed dalkeena.



## Goobta doorashada

Goobta codeyntu waa dhisme, sida dugsi ama xarun bulsho, halkaas oo dadku ay aadaan si ay ugu codeeyaan inta doorashada lagu jiro.




## Codbinta boostada ah

Noogu soo dir codbixintaada boostada.

## Aqalka sharci dejiyayaasha

Aqalka sharci dejiyayaasha:

- Waa mid (1) ka kooban labada (2) aqal ee Baarlamaanka Australia – waxaa loo yaqaan aqalka sare
- waxaa ku jira 76 qof oo ay u codeyeen dadka australiyaanka ahi si ay u metelaan mid kasta oo ka mid ah:
  - 6-da gobol
  - 2-da territory





## Codee

Markaad codeeyso, waxaad ka caawineysaa doorashada qofka qayb ka noqonaya dawlada Australia.



## Cod bixiyeyaalka

Dadka codeyn kara.



## Nagala soo xiriir

Adeega Tebinta Qaranka (NRS)



Isticmaalayaasha TTY:

- Wac 13 36 77
- Weydiiso 13 23 26



Hadal oo dhageyso isticmaalayaasha:

- Wac 1300 555 727
- Weydiiso 13 23 26



Isticmaalayaasha tebinta internetka:

- Ku xir NRS
- Weydiiso 13 23 26



Luuqadaha kale:

- Wac 1300 720 153



[www.aec.gov.au](http://www.aec.gov.au)



[/AusElectoralCom/](https://www.facebook.com/AusElectoralCom/)



[@AusElectoralCom](https://twitter.com/AusElectoralCom)



[@auselectoralcom](https://www.instagram.com/auselectoralcom)



Kooxda Isticmaalka Macluumaadka waxay daabaceen tusahan sida sahlan loo akhrin karo iyagoo isticmaalaya muuqaalo sawiro u gaar ah. Muuqaalada waxaa laga yaabaa inaan dib loo isticmaali ogolaansho la'aan. Wixii weydiimo ah oo ku saabsan, muuqaalada, fadlan booqo. [www.informationaccessgroup.com](http://www.informationaccessgroup.com). Sheeg lambarka shaqada 3035-B.

Waxaa Idmay Ku xigeenka Guddoomiyaha Doorashada, Canberra.